

Habka Racfaanka ee Barnaamijka Gargaarka Dhanka Guryaha ee COVID-19

Hadii lagu diido gargaarka dhulka guryaha, maamulaha deeqdu waxa uu ku siin doonaa warqad diidmo ah oo ka hadlaysa sababaha laguugu diiday deeqda. Waxa aad ka qaadan kartaa racfaan go'aanka diidmada ah, taa oo noqon karta qoraal ama afka, 10 cisho gudahood laga bilaabo maalinta aad hesho warqada diidmada.

Kolka uu helo codsiga racfaanka ah, maamulaha deeqdu waxaa uu xil-saari doonaa qof shaqaalaha ka tirsan inuu dib u eego codsigaaga racfaanka ah. Hadii kolka dib loo eego codsigaaga la go'aamiyo inaad xaq u leedahay, waa lagu gargaari iyadoo lagu salaynayo gargaaraka waqtiga iyo taariikhda codsigii asalka ahaa la soo gudbiyey. Hadii mar labaad la go'aamiyo inaad xaq u lahayn deeqda, warqad ku saabsan go'aanka racfaanka ayaa lagu soo diri doonaa iyo sababaha diidmada loo ayiday.

Maamulaha deeqdu waxa uu ku dhamayn doonaa dib u eegida racfaanka 5-cisho gudahood kolka uu helo codsiga. Hadii racfaanka lagu guuleysto, helida gargaarkaagu waxa ay ku xirnaan doontaa in wax dhaqaale ah oo Barnaamijka Gargaarka Guryaha ee COVID-19 ka uu leeyahay la heli karo maalinta go'aanka racfaanka ka gaaray. Ku guuleysiga lagu guuleysto racfaanku ma bixiyo hubaal ah in gargaar la heli doono.